

Xaashida Xogta Hormarinta Shahaadada Waalidnimada ee CPI



Waa maxay Hormarinta Shahaadada Waalidnimada?

Certificate of Parental Improvement (Hormarinta Shahaadada Waalidnimada, CPI) waxaa weeye qiimayn habdhaqanka, haboonaanta iyo wax ku oolnimada shakhsi ahaaneed ee la xidhiidha helitaanka tacadiga ama dayacaada ilmaha iyo hadii shakhsigu si wanaagsan u cadeeyay arrimaha keeney warbixinta tacadiga ama dayacaada.

CPI waxay ka caawisaa shakhsiyaadka inay meesha ka saaraan caqabadaha marka ay dalbanayaan shaqooyinka ama kaalinta ku lug lahaanshahooda shacabka nugal. Waxaa kamid ah qorista xarumaha nolosha la kaalmeeyay ama guryaha xanaanada, adeegyada daryeelka mudada dheer, ama barnaamijka Department of Children, Youth, and Families (Waxda Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska, DCYF).

Sida loo dalbado CPI

- Qabo websaytka Certificate of Parental Improvement (Hormarinta Shahaadada Waalidnimada, CPI) dcyf.wa.gov/safety/can-founded-findings/cpi oo akhri shuruudaha u qalanka, ee ku qoran RCW 74.13.720(4) (<https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=74.13.720>).
- Buuxi Foomamka ogolaanshaha eegitaanka taariikhda hore ee onleynka ah (<https://fortress.wa.gov/dshs/bcs>) iyo Dalabka CPI (www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=09-012&title=).
- Marka DCYF ay hesho dalabkaaga CPI, Qaybta Qiimaynta Joogtada ah ayaa kula soo xidhiidhi doonta oo kaa caawin doonta buuxinta nidaamka. DCYF waxay ku go'aamin doontaa hadii ay ku siinayso CPI ama hadii kale 60 maalmood gudahood marka ay hesho dalabkaaga oo buuxa.

Yaa qaata CPI?

DCYF iyo Department of Social and Health Services (Waxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, DSHS) waa inay eegaan habdhaqanka, xasiloonida iyo wax ku oolnimada shakhsi ahaaneed guud ahaan marka uu ka shaqaynayo meelaha la kormeeray ee uu la joogo dadka nugal. Ma ogolaan doonaan in ruux si toos ah looga saaro u qalankiisa CPI.

Miyaad qabtaa su'aalo?

Fadlan kala xidhiidh DCYF dcyf.cpi@dcyf.wa.gov ama 1-800-998-3898, ikhtiyaaro 8, hadii aad ka shakido u qalankaaga ama hadii aad qabto su'aalo.



Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION ADM_0034 SM (06-2025) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES